

AAN DHINNO SINNAAN LA'AANTA DHEDDIGGA IYO  
LABKA EE KA DHEX JIRTA INTERNET-KA

# WIKIGap

Peace Hotel, Muqdisho, Soomaaliya  
Khameis, 8 Maarso 2018, 10:00-12:00

## Taariikhda Haweenka Soomaaliyeed

**FOJO:**  
MEDIA INSTITUTE  
■ ■ Linnæus University





#### Horudhac

Xaliimo Ismaaciil Ibraahim (English: Halima Ismail Ibrahim) oo ku magac dheer "Xaliimo Yareey" waa Guddoomiyaha Guddiga madaxa bannaan ee doorashooyinka qaran. Waa gabadhii ugu horreysay ee xilkaas qabata taariikhda Soomaaliya. Horay waxa ay u aheyd guddoomiyaha guddiga farsamada ee dhismaha maamul goboleedka Galmudug, iyada oo sidoo kale noqotay La-guddoomiyaha guddiga farsamada ee xulitaanka baarlamaanka federaalka ah doorashadii 2012ka.

Waxa hooyo dhashay saddex carruur ah oo saygeeda Injineer Cabdulaahi Ismaaciil Cashuur lagu dilay magaalada Muqdisho 18ka Nofeembar, 2014kii. Cashuur wuxuu la shaqeeyay wasaarada arrimaha gudaha iyo maamulka gobolka Banaadir, wuxuuna kaalin weyn ku lahaa dhismaha jidadka iyo bulaacadaha magaalada Muqdisho.

#### Bilowgii nolosheeda

Xaliimo Ismaaciil waxa ay 23kii Diseembar 1956dii ku dhalatay magaalada Muqdisho, gaar ahaan isbitaalka hooyada iyo dhallaanka ee Martiini ee uu dhisay gumeystihii Talyaaniga 1912kii. Waxa ay ku barbaartay xaafada isku-raranka ee degmada Xamaweyne. Waxa ay ku kortay guriga abtigeed oo shaqaale ka ahaa wasaarada caafimaadka ee Soomaaliya maadaama hooyadeed iyo aabbeheed ay kala tageen iyada oo uurka lagu sido.

#### Waxbarashada

Waxa ay waxbarashada dugsiga hoose ku qaadatay qaadatay dugsiga xanaanada oo la dhehi jiray Finta Kuwaataro Maajo Intii u dhaxeysay 1965-1966. Dowladdii Kacaanka ayaa mar dambe dugsigaas ugu magacdaray Xaaji Barsane. Shiikh Xasan Xaaji Barsane wuxuu ahaa halgamaa la dagaalay

ciidamada gumeysiga Talyaaniga islamarkaasna ka hortagay iskuday boqortooyada Itoobiya ku doonaynaysay inay ku qabsato xuduudka Soomaaliya ee gobolka Hiiraan.

Waxa ay 1967-1968 waxbarashada dugsiga dhexe ku qaadatay dugsiga Media Centrale (Mardambe ayaa magaca laga badelay oo loo bixiyay dugsiga Bartamaha). Waxa ay ka qalinjabisay dugsiga saree e Raage Ugaas sanadkii 1967.

Xaliimo waxa ay shahaadada koowaad ee jaamacada ku qaadatay cilmiga beeraha iyada oo ka qalinjabisay Jaamacada Ummadda Soomaaliyeed sanadkii 1981dii. Waxa ay kadib heshay deeq waxbarasho oo dalka Talyaaniga ah, waxa ayna jaamacada shahaadada heerka labaad ee jaamacada (Master's degree) ee cilmiga dhaqaalaha iyo beeraha ka qaadatay jaamacada Turino sanadkii 1983dii.

#### Xirfad shaqo

Waxa ay Xaliimo Soomaaliya dib ugu soo noqotay isla sanadka 1983dii kadib markii ay soo dhamaysatay waxbarashada ay dalka Talyaaniga u joogtay. Shaqadeedii ugu horreysay waxa ay ka bilowday Jaamacada Ummada oo ay ka noqotay kaaliye bare (assistant lecture). Saddex sano kadib ayay noqotay bare buuxa oo jaamacada ka tirsan iyada oo dhigi jirtay cilmiga beeraha iyo dhaqaalaha. Waxa ay shaqadaas haysay ilaa iyo jaamacada ka xirantay 1991 markaas oo dowladdii keliteliska ahayd ee Maxamed Siyaad Barre la riday. Inta ay jaamacada ka shaqeynaysay Xaliimo waxa ay qabatay shaqooyin dhowr ah oo mutadawacnimo ah. Shaqooyinkaas waxaa ka mid ah mashruucii weynaa ee bacaad-celinta Shalaanbood ee gobolka Shabeelada Hoose, kaas oo ku guuleystay inuu joojiyo bacaadkii ku sii durkayey waddooyinka isku xira Muqdisho iyo jubbooyinka. Waxa ay Xaliimo sidoo kale ka mid ahayd dhallinyaradii ka qeyb-qaadatay olalaha barashada afsoomaaliga ee loo diray dhulka miyiga ah si ay dadka reer guuraaga ah usoo baraan qoraalka afsoomaaliga oo la hirgeliyay 1973dii.

Waxa ay sidoo kale la shaqeysay Waaxda Bulshada iyo Horumarinta dadka ee xibsigii talada hayay ee Hantiwadaaga Soomaaliyeed.

Waxa ay 1992 ka mid noqotay howlwadeennada Soomaalida ah ee howlgalka Qaramada Midoobay

Taariikhda haweenkan Soomaaliyeed ee ku daabacan buuggan waxaa daraaseeyay oo qoray Nado Yusuf Cumar, Nasriin Maxamed Ibraahim, Fatxi Maxamed Axmed iyo Fadumo Taxadar Yusuf. Waxaa mashruucan maamulay oo tifaftiray Fadumo Taxadar Yusuf.

ee Soomaaliya (United Nations Operations in Somalia; UNOSOM). Waxa ay ahayd sarkaalka howlgalka ku qaabilsan arrimaha siyaasada. Waxa ay si gaar ah uga shaqaysay arrimaha dib-u-heshiisiinta iyo dhismaha goleyaasha heer gobol iyo degmo, howlahaas oo si gaar ah loogu dhiirogelinayay islamarkaasna qor loogu qaadayay kaalinta haweenka ee hoggaaminta siyaasadeed iyo talo ku-yeelashada go'aamada maamulka. Mudada ay la shaqeynaysay UNOSOM waxa ay isu keentay haween Soomaaliyeed oo hoggaamiyeyaal ah kuwaas oo ka kala yimid gobolada dalka oo dhan si ay ugu yeeshaan cod mideysan iyo kaalin xoog leh oo muuqata dedaalada dib-u-heshiisiinta kooxaha siyaasada. Sidoo kale waxa ay Xaliimo xubin ka ahayd guddiga ka shaqaynayay heshiisiinta hoggaamiyeyaasha Cali Mahdi Mohamed iyo Janaraal Maxamed Faarax Caydiid oo ku dagaalamayay islamarkaasna qad cagaaran kala dhex dhigay magaalada. Xaliimo waxa ay isaga tagtay Soomaaliya sanadkii 1996dii markaas oo ay Qaramada Midoobay joojisay howlgalka UNOSOM, isagana baxday Soomaaliya iyada oo ay dagaaladuna sii kordhayeen. Waxa ay u guurtay dalka Mareykanka oo ay ku nooleyd ilaa 2007dii.

#### **Bulshada rayidka/Siyaasad**

Xaliimo Ismaaciil waxa ay xubin ka ahayd ururada bulshada rayidka wixii ka dambeeyay markii dowladda militariga ay dhacday. Waxa ay ka mid ahayd koox haween ah oo ay hoggaamineysay Xaliimo Cabdi Caruush oo aasaasay ururka IIDA bishii May sanadka 1991. Ururka wuxuu ka shaqeeyaa horumarinta danaha iyo xirfadaha haweenka Soomaaliyeed, nabadiinta iyo heshiisiinta bulshada, difaacida iyo u doodida xaquuqda aadanaha iyo dhiirogelinta ka qeybgalka haweenka ee arrimaha siyaasada, dib u heshiisiinta qaran, dib-u-dhiska iyo horumarinta dhaqaalaha dalka.

Waxa ay 1995 hogaaminaysay koox haweenka Soomaaliyeed ah ee ka qeybgalay shirwaynihii Aayaha Haweenka ee dalka Shiinaha. Wixii markaa ka dambeeyay waxa ay u guurtay dalka Mareykanka maadaama ay sii kordheen dagaalada iyo colaadaha sokeeye. Waxa ay Soomaaliya dib ugu soo noqotay 2007dii, iyada oo noqotay xiriiriyaha howlaha ururka IIDA. Waxa ay maamushay mashaariicda IIDA ee dhanka waxbarashada, caafimaadka iyo xaquuqda haweenka ee isla gobolkaas.

Waxa 2011dii Xaliimo loo doortay inay noqoto guddoomiyaha Isbaheysiga Ururada Bulshada Rayidka oo ujeedka loo dhisay uu ahaa in la mideeyo codka iyo awooda, iyo dedaalka ururada bulshada ee ku aadan in Soomaaliya ay ka baxdo dowladnimada ku-meel-gaarka ah oo ay yeelato dowlad joogta oo aan qabyo ahayn. Xaliimo waxa ay 2012kii La-guddoomiye ka noqotay Guddiga Farsamada ee u xilsaarnaa hubinta iyo soo-xulida xubnaha baarlamaanka federaalka ah ee dowladda Soomaaliya. Waxa uu guddigaas ku guuleystay dhismaha baarlamaankii ugu horreeyay ee lagu doorto gudaha Soomaaliya wixii ka dambeeyay markii ay dhacday dowladdii militariga aheyd 1991. Wuxuu baarlamaankaas sees u noqday dhismaha dowlad buuxda oo ay Soomaaliya yeelato taas oo heshay aqoonsi caalami ah. Waxaa dowladaas madaxweyne ka ahaa mudane Xasan Shiikh Maxamuud.

Xaliimo iyo koox kale oo haween ah ayaa Juun 2014kii aasaasay Ururka Hoggaanka Haweenka Soomaaliyeed (SWLI) oo kala shaqeeya haweenka Soomaaliyeed iyo hay'adaha caalamiga ah si loo taageero kaalinta haweenka dhanka siyaasada iyo howlaha kale.

Xaliimo waxa ay sidoo kale noqotay guddoomiyaha guddiga farsamada ee shirka maamul u sameynta gobolada dhexe. Guddiga ayaa sidoo kale maamulayay soo xulida ergooyinka doortay xildhibaanada Galmudug, iyaga oo sidoo kale maamulay doorashada madaxweynaha iyo madaxweyne xigeenka maamul goboleedkaas. Baarlamaanka Federaalka ah ee Soomaaliya ayaa 6 Luulyo, 2015ka ansixiyay guddiga madaxa banaan ee doorashooyinka qaran oo ka kooban 11 xubnood. Guddiga waxaa horey usoo magacaabay wasaarada arrimaha gudaha ee dowladda federaalka ah ee Soomaaliya. Isla 25kii Bishaas ayay xubnaha guddiga u doortay in Xaliimo Ismaaciil Ibraahim noqoto guddoomiyaha guddiga doorashooyinka qaran.

Waxa uu guddiga u xilsaaran yahay in uu Soomaaliya gaarsiyo doorasho qof iyo cod ah sanadka 2020ka. Waxaa loo arkaa Xaliimo Ismaaciil inay tahay gabadha ugu awooda badan xilligan dhanka siyaasada, waana gabadhii ugu horreysay ee guddoomiye u noqota guddiga.

## 2

### **Xildhibaan Naciimo Maxamed Gacal**



#### **Horudhac**

Naciimo Maxamed Gacal waa xildhibaan ka tirsan Golaha Shacabka ee baarlamaanka federaalka ah ee Soomaaliya. Waxa ay ahayd gabadhii ugu da'da yarayd baarlamaankii 9aad ee Muqdisho lagu doortay sanadkii 2012kii. Waxaa mar labaad dib loogu doortay baarlamaanka 10aad dhamaadkii sanadkii 2016ka. Waa 25 sano jir aan weli guursan. Waxaa la dhashay afar gabdhood iyo afar wiil.

#### **Bilowgii nolosheeda**

Xildhibaan Naciimo Gacal waxa ay ku dhalatay degmada Howlwadaag ee gobolka Banaadir sanadkii 1992dii. Waxa ay dhalatay iyada oo uu socdo dagaalkii u dhaxeeyay Cali Mahdi iyo Maxamed Faarax Caydiid oo loo bixiyay afar biloodka. Labada hoggaamiye ayaa ku hardamayay awooda iyo maamulka magaalada Muqdisho. Waxa ay ka wada tirsanaayeen jabhada la magacbaxday Golaha Midnimada Soomaaliyeed (United Somali Congress - USC) ee ka mid ka ahaa jabhadaha xukunka ka tuuray dowladdii kelitaliska ahayd ee madaxweyne Maxamed Siyaad Barre. Waxa ay ku barbaartay isla magaalada Muqdisho si gaar ah degmooyinka Howlwadaag iyo Waaberi.

#### **Waxbarashada**

Xildhibaan Naciimo waxa ay waxbarashada aasaasiga ah ku qaadatay magaalada Muqdisho. Waxa ay dhamaan waxbarashadeedii dugsiga hoose, dhexe iyo sare ku qaadatay Iskoolka Al-Mathal ee degmada Waaberi ku yaala intii u dhaxeysay 2001-2009kii. Isla sanadkaas ayay u safartay dalka Sudan, iyada oo ku biirtay jaamacada Ahfad ee magaalada Khartuum ku taala. Sanadkii 2012ka ayay dhammaysay jaamacadaas oo ay ka qaadatay shahaadada koowaad (Bachelor's degree) ee cilmiga caafimaadka bulshada (Public Health).

#### **Siyaasadda**

Naciimo Gacal waxa ay dalka kusoo noqotay dhamaadkii sanadkii 2012ka xilligaas oo uu socday olalaha xulista xubnaha baarlamaanka ee dooran lahaa madaxweynaha Soomaaliya ee 2012-2016. Odeyaasha reerkeeda ayaa u ololeeyay inay iyadu ku fadhiisato kursiga xildhibaanimo ee reerkeeda. Iyada oo 20 sano jir ah ayay ka mid noqotay baarlamaanka 9aad, waxa ayna noqotay qofka ugu da'da yar 275 xildhibaan ee xubnaha ka ah Golaha Shacabka. Waxa ay ahayd shaqadii ugu horreysay kadib marka ay soo dhammaysatay waxbarashada jaamacada.

Waxaa markale dib loogu doortay Golaha Shacabka ee baarlamaanka federaalka sanadkii 2016kii. Hadda waxa ay xubin ka tahay Guddiga baarlamaanka ee arrimaha carabta.

#### **Abaalmarin**

Xildhibaan Naciimo Maxamed Gacal waxa ay shahaado abaalmarin ah ka heshay dowladda Masar sanadkii 2012kii oo ay ka mid ahayd wafdi heer baarlamaan ah oo uu hoggaaminayay guddoomiyaha Golaha Shacabka Maxamed Shiikh Cusmaan Jawaari. Waxa ay wafdiga iyo safarka Masar ku matalaysay haweenka xildhibaanada ah ee ku jira baarlamaanka. Waxaa abaalmarinta ku muteysatay shaqada ay u hayso qaranka Soomaaliyeed iyo da'yaraanteeda.

## Baar Siciid Xaaji Faarax Jaamac



### Horudhac

Baar Siciid Xaaji Faarax Jaamac waa xildhibaanad ka tirsan Golaha Wakiilada Somaliland. Waa gabadha keliya ee xubin ka ah golaha sharci dejinta 82 xildhibaan. Gabar kama mid ahan, loomana oggola inay xubin ka noqoto Golaha Guurtida Somaliland oo isna ka kooban 82 xildhibaan. Baar waxa ay xildhibaanad tahay ilaa 2005tii xilligaas oo la qabtay doorashadii ugu dambaysay ee baarlamaanka Somaliland oo loo qeybiyo labo golle oo kala ah: Golaha Wakiilada (Golaha Hoose) iyo Golaha Guurtida (Golaha Sare) oo ah golaha duqeyda. Waa hooyo dhashay 11 carruur ah oo 7 gabdho yihiin.

### Bilowgii nolosheeda

Xildhibaan Baar Siciid waxa ay sanadkii 1955 ku dhalatay degmo xeebeedka qadiimiga ah ee Laasqoray ee gobolka Sanaag. Waxa ay dhalatay xilli barwaaqo ah iyo dharaar jimce ah, oo weliba bil soon ah. Waxa ay Baar ka dhalatay qoys lagu yaqiin hoggaaminta dhanka dhaqanka iyo siyaasada. Hooyadeed Timiro Axmed Cawad waxa ay xubin ka ahayd guddiga magaalada Diraan ee barriga gobolka Sanaag. Waxa ay markii dambe noqotay guddoomiyaha magaalada Diraan intii u dhaxeysay 1970 - 1980kii. Awoowgeed aabbe Xaaji Faarax Jaamac iyo adeerkeed ba waxa ay ahaayeen caaqillo iyo suldaammo gobolka caan ka ah oo loogu soo hirto hoggaamin iyo nabadeyn.

Baar waa qof deggan oo aan hadal iyo ciyaar badnayn xitaa carruurnimadeedii oo ay jeclayd inay la saaxiibto kuna dhex jirto dadka ka waaweyn.

### Waxbarasho

Xildhibaan Baar Siciid waxa ay waxbarashada dugsiga Hoose iyo Dhexe ku qaadatay degmada

Buraan iyada oo sanadkii 1969kii ka baxday dugsiga Buraan. Kadib waxa uu qoyskeedu u guuray magaalada Muqdisho halkaas oo ay ku qaadatay waxbarashada dugsiga sare iyada oo dhammaysay dugsiga sare ee Banaadir sanadkii 1973. Uma suurogelin Baar inay gasho waxbarasho jaamacadeed maadaama ay guursatay sanad uun kadib markii ay dhammaysay waxbarashada dugsiga sare.

Laakiin waxa ay qaadatay tababarro iyo maddooyin gaagaaban oo la xiriira maamulka iyo maareynta, dhaqaalaha, ganacsiga, siyaasada iyo nabadgelyadda.

### Siyaasad iyo howlaha bulshada

Kahor inta aysan ku biirin siyaasada, Baar Siciid waxa ay ka shaqaysay howlaha gargaarka iyo Ururada bulshada rayidka. Waxa ay iyada iyo hablo kale wada aasaaseen ururo maxali ah oo ka shaqeeya arrimaha bulshada iyo wacyigelinta 1993. Waa ay balaariyeen howlahooda iyaga oo ururka u badalay hay'ad gargaarka oo caawisa dadka dhibaataysan ee deegaankooda.

Baar Siciid waxa ay ku biirtay siyaasada sanadkii 2001dii markaas oo ay ka mid noqotay siddeeda xubnood ee gobolka Sanaag ku matalayay Ururka Dimuqraadiga Ummadda Bahawday (UDUB) oo xilligaa ahaa xisbi siyaasadeed cusub. Waxaa Udub aasaasay madaxweynihii labaad ee Somaliland Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal (AHU). Waxa ay Baar noqotay guddoomiyaha garabka haweenka xisbiga Udub ee gobolka Sanaag isla sanadkaas.

Waxa ay sidoo kale ahayd guddoomiyaha ururka haweenka qaranka Somaliland (National Organization for Women – NOW) garabka gobolka Sanaag intii u dhaxeysay 1997-2005tii.

Baar Siciid waxa ay ka mid ahayd shan haween musharixiin ah oo u tartamay doorashadii ugu horreysay, uguna dambaysay ee mudanyaasha labada golle ee baarlamaanka Somaliland oo dhacday 2005. Iyada oo keli ah ayaa ku guuleystay kursiga Golaha Wakiilada, waxa ayna sidaas ku noqotay gabadha keli ah kursi ku leh golaha ka kooban 82 xubnood. Inkastoo ay Somaliland ka dhacday saddex doorasho madaxweynenimo, haddana weli laguma guuleysan in la qabto doorashada xubnaha baarlamaanka Somaliland oo

hadda xafiiska jooga 13 sano oo doorasho la'aan ah. Dastuurka Somaliland ayaa faraya in shantii sano ba mar la doorto madaxweynaha iyo baarlamaanka Somaliland. Waxaa hadda la qorsheeyay in doorashada baarlamaanka la qabto sanadka dambe.

Fadumo Jaamac Illeye ayaa ah gabadha kaliya ee iyana xubin ka noqotay Golaha Guurtida kadib markii ay badeshay seygeeda xildhibaan Maxamed Cismaan Libaaxo oo ku geeriyooday weerar ismiidaamin oo Al-Shabaab ka geysteen magaalada Hargeysa sanadkii 2008. Afar sano ayay ka mid ahayd golaha laakiin sanadkii 2013ka ayay iska casishay xubinnimada Guurtida iyada oo sababta ku sheegtay inay ku guuldareystay inay horseedo isbadel macno leh oo dumarka u dan ah iyo golaha oo noqday madal ragga u gaar ah. Waxaa badalay wiilkeeda oo kan qofka ugu da'da yar Golaha Guurtida.

Taas ayaa ka dhigeysa Baar Siciid codka keli ah ee haweenka Somaliland ku dhex leeyihiin barlamaanka Jamhuuriyada Soomaaliya ka go'aday laakiin aan weli helin aqoonsi caalami ah. Waxa ay u ololaysaa ansixinta sharci haweenka siinaya qoondo gaar ah oo ka mid ah kuraasta baarlamaanka Somaliland, kuwaas oo ka reeban inay rag u tartamaan. Waxa ay hannaankaas u aragtaa habka keli ah ee ku dhiirogelin karin haweenka inay ka qeybgalaan siyaasada islamarkaasna horseedi kara inay kordhaan tirada haweenka xubnaha ka ah baarlamaanka Somaliland. Laakiin baarlamaanka ragga wada ah ayaa dhowr jeer diiday ansixinta qoondada haweenka.

Labo dumar ah oo keli ah ayaa wasiir buuxa ka ah dowladda cusub ee madaxweyne Muuse Biixii. Hal gabadh oo keli ah ayaa wasiir xigeen ka ah 23ka wasiir kuxigeen ee uu madaxweynuhu magacaabay. Baar Siciid waxa ay dowladda cusub ee xisbiga Kulmiye ku eedeysay inay aad uga gaabisay saamiga haweenka ee golaha wasiirada, iyada oo sheegtay dumarka ugu badan u codeeyeen xisbiga talada haya ee Kulmiye doorashadii bishii Nofeembar, 2017.


Xildhibaan Baar Siciid waxa ay hadda waqtigeeda ugu badan ku qaadataa magaalada Ceerigaabo ee gobolka Sanaag, halkaas oo ay ka qabato shaqooyin mutadawacnimo ah sida ceelal qodis. Waxa ay sidoo kale halkaas ka hirgalisay dhul beeroodyo, Waxa

ay jeceshay inay beeralay iska noqoto marka ay howlgab ka noqoto siyaasada.

### Abaalmarin

Xildhibaan Baar Siciid waxa ay sanadkii 2015kii ku guuleysatay abaalmarinta 100 qof ee ugu saameynta badan Somaliland. Waxay abaalmarinta kula guuleysatay madaxweynaha Somaliland Axmed Maxamed Maxamuud 'Siilaanyo', Xaaji Cabdikariim Xuseen oo ku magacdeher 'Cabdi Waraabe' oo ah qofka ugu da'da weyn Golaha Guurtida iyo wasiirkii hore ee madaxtooyada Somaliland Xirsi Cali Xirsi.

## Xildhibaan Sagal Abdirisaaq Isaaq Biixi



### Horudhac

Sagal Cabdirisaaq Isaaq Biixi waa xildhibaan ka tirsan Golaha Shacabka ee baarlamaanka federaalka ah ee Soomaaliya. Waxa ay ka mid tahay hablaha dhallinyarada ah ee ku cusub Golaha Shacabka ee baarlamaanka 10aad. Waxaa lagu doortay magaalada Kismaayo bishii Nofeembar, 2016kii. Kahor doorashada waxa ay la soo shaqaysay dhowr ka mid ah wasaaradaha dowladda federaalka ah ee Soomaaliya. Aabeheed Janaraal Cabdirisaaq Isaaq Biixi waxa uu ka mid ahaa saraakiisha ciidamada qalanka sida isaga oo markii dambe xildhibaan iyo wasiir ka noqday dowladihii ku-meel gaarka ahaa.

### Bilowgii nolosheeda

Xildhibaan Sagal Biixi waxa ay bishii Diseembar sanadkii 1982dii ku dhalatay magaalada Muqdisho. Waxa ay qeyb ka mid carruurnimadeeda ku qaadatay degmada Baledxaawo ee gobolka Gedo. Waxa ay Sagal ka dhalatay qoys aad uga dhex muuqday ciidamada qalabka sida ee Soomaaliyeed. Aabeheed Cabdirisaaq iyo adeerkeed Maxamed Isaaq Biixi waxa ay labaduba ahaayeen janaraalo.

Janaraal Cabdirisaaq waxa uu sanadkii 1981dii taliye ka ahaa qaybta 21aad ee ciidamada xoogga Soomaaliyeed. Wixii ka dambeeyay burburkii dowladdii keli-teliska ahayd ee madaxweyne Maxamed Siyaad Barre, wuxuu janaraalku xildhibaan ka noqday dowladdii ku-meel gaarka ahayd ee 2000 Jabuuti lagu dhisay ee madaxweyne Cabdiqaasim Salaad Xasan. Wuxuu uu sidoo kale xildhibaan ka noqday baarlamaanadii xigay ee uu ugu dambeeyay kii xilligiisu ku ekaa 2012ka ee dowladihii madaxweyne Shariif Shiikh Axmed. Waxa uu sidoo kale wasiirka gaashaandhiga ka noqday dowladdii KMG ahayd ee madaxweyne Cabdulaahi Yusuf Ahmed ee lagu dhisay dalka Kenya sanadkii

2004ta. Eedadeed Faadumo Isaaq Biixi waxa ay iyana ahayd safiirka dowladdii Maxamed Siyaad Barre u fadhiiyay xarunta xarunta Qaramada Midoobay ee Geneva.

### Waxbarashada

Waxbarashadeeda aasaasiga ah ilaa heer jaamacad waxay ku qaadatay gudaha Soomaaliya. Degmada Beled-Xaawo ee gobolka Gedo ayay ka soo dhigatay dugsiga hoose iyo dhexe, iyada oo ka qalinjabisay dugsiga sare ee Axmed Gurey ee magaalada Muqdisho Sanadkii 2003. Waxa ay kadib ku biirtay jaamacadda Muqdisho oo ay sanadkii 2007 ka qaadatay shahaadada koowaad (Bachelor's degree) ee cilmiga maamulka iyo maareynta. Heerka labaad ee jaamacadda waxay ku soo qaadatay dalka Bakistaan, iyadoo kulliyadda maamulka mashaariicda uga baxday jaamacadda Iqra sanadkii 2010.

### Xilalka ay soo qabatay

Waa guddoomiyihii hore ee guddiga xuquuqul-insaanka iyo haweenka ee baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya, xilkaas oo loo doortay bishii Abriil ee sanadkii 2017. Intii u dhaxeysay sanadihii 2013 ilaa 2014 waxay agaasime ku-xigeen ka soo noqotay idaacadda Bar-kulan oo ahayd mashruuc ku dhisnaa maalgelin ay siiyaan deeq-bixiyeyaal caalami ah. Intii u dhaxeysay 2011 ilaa 2012 waxay la-taliye ka soo noqotay wasaaradda gaashaandhigga. Muddadii u dhaxeysay 2014 – 2015 waxay la soo shaqaysay wasaaradda dastuurka, iyadoo madax u ahayd qeybta horumarinta dastuurka. Sidoo kale sanadkii 2015 waxay la-taliye dhinaca xuquuqul-insaanka ah, gaar ahaan jandarka ka noqotay wasaaradda xuquuqul-insaanka iyo arrimaha haweenka.

### Sagal iyo siyaasadda

Sagal Biixi u sheegtay bogga ka faallooda arrimaha baarlamaanka Soomaaliyi ee Kalfadhi in ay wax badan ku taamaysay in ay mar qabato xafiis la isku doorto iyadoo u arkaysay meelaha ay isbeddel weyn ka samayn karto. Taas ayaa ah sababta ku dhiirrigelisay inay xildhibaanimo raadiso. Waxay xiiseysaa akhrinta taariikhda iyo u dhaqdhaqaaqidda xuquuqul-insaanka, gaar ahaan waxbarashada gabdhaha. Waxay sheegtay inay si hoose ula socoto baahiyaha ka jira deegaanka laga soo doortay. Waxay u dhaqdhaqaaqdaa sidii ay dadka deegaankaas u heli lahaayeen waxyaabaha ay xaqa u leeyihiin iyo sidoo kale in lagu dhiirrigeliyo ka faa'ideysiga fursaha ay haystaan.

## Sahra Axmed Kooshin



### Horudhac

Sahro Axmed Kooshin waa cilmibaare, gabyaa, qoraa iyo hal-abuure ganacsi arrimaha bulshada ah. Sahro waxaa lagu yaqaan u dhaqdhaqaaqista arrimaha bulshada, horumarinta waxbarashada haweenka, caafimaadka, u gargaaridda dadka tabaaleysan iyo ka shaqaynta cilmi baarista. Sanado badan waxa ay la-taliye arrimaha haweenka ah u ahayd qaybo kala duwan oo ka mid ah dawladda iyo ururadda bulshada. Waa hooyada gabadh yar oo la yiraa Najma-Bilan.

### Bilowgii nolosheeda

Sahro Kooshin waxa ay ku dhalatay magaalada Muqdisho 20 Oktoobar, 1980. Waxay yaraanteedii ku soo barbaartay dalka dibaddiisa oo waxbarashadeeda hoose ilaa sare ku qaadatay, halka Bach-keedii iyo master-keediiba ku soo dhamaaystay dalka Holland. Waxaa la dhalatay toban gabdho ah iyo saddex wiil.

### Waxbarasho

Sahro Kooshin waxa ay waxbarashada dugsiga hoose, dhexe iyo sare ba ku qaadatay magaalada Lusaka ee caasimada u ah dalka Zambia, halkaas oo ay ku barbaartay. Waxbarashada jaamacada waxa ay ku qaadatay dalka Netherlands, iyada oo shahaadada koowaad (Bachelor's degree) ee cilmiga aadanaha iyo dhaqankooda (Cultural Anthropology) ka qaadatay jaamacada Leiden sanadka 2005tii. Isla jaamacadaas ayay ka qaadatay shahaadada heerka labaad ee jaamacada (Master's degree) ee isla cilmigaas sanadkii 2006dii. Waxa ay sidoo kale shahaadada heerka labaad ee jaamacada ee cilmiga faraasaadka horumarinta ka qaadatay jaamacada Radboud ee isla Netherlands ku taal.

### Shaqo

Waxbarashadeeda kaddib waxa ay ka shaqaysay

dalal dhowr ah oo ay colaado ka jiraan kuwaas oo ay ka mid yihiin Sierra Leone, Soomaaliya, Sudan iyo Kenya. shaqadeedii ugu horreysay ka bilowday dalka Sierra Leone sannadkii 2006. Hay'adaha ay la shaqaysay waxaa ka mid ah CARE, Cordaid, Hvos, Qaramada Midoobay iyo Midowga Yurub shaqaysay mashruuc la magac baxay Kobcinta Waxbarashada gabdhaha, kaasoo hoos tagayay Wasaaradda Waxbarashada ee Puntland. Sidoo kale ayay u noqotay La-taliye dhanka arrimaha jandarka. Sahro waxa ay sidoo kale noqotay agaasime Xigaha Machadka Soomaaliyeed ee Horumarinta iyo Cilmibaarista (Somali Institute for Development and Research; SIDRA) oo ah xarun cilmibaariseed oo fadhigeedu yahay Garoowe, Soomaaliya. Hadda waa cilmibaare iyo la-taliye madaxbanaan.

### Qoraa iyo hal-abuure

Sahro waa qoraa, waana gabyaa leh dhowr buug. waxay wax badan ka tiri arrimaha haweenka Soomaaliyeed, iyadoo wax qorista bilowday sanadkii 1999 iyadoo ku sugan dalka Holland halkaasna ay abaalmarin caalami ah ku heshay. Waxaa ay qortay ilaa afar buug oo midkeeda ugu dambeeyay uu ku saabsan yahay taariikh nololeedka Aabaheed iyo guud ahaan qoyskeeda.

Buugeedii ugu horreeyay ee 'Between Summon and Echo' waxaa la daabacay 2002dii. Buugeedii labaad 'Sounds of Laughter; An Anthology of from the heart of the Somali woman' waxaa la daabacay 2014kii, halka buugeeda saddexaad ee 'Isniino, a little Somali girl' ee la daabacay 2016kii uu ku saabsan yahay noloshu gabar yar oo qoyskoodii laga soo afduubtay islamarkaasna lagu qabsay inay adeegto u noqoto reer ku nool magaalo weyn. Buuggu wuxuu sawir ka bixinayaa noloshu carruurta Soomaaliyeed ee qoyskooda laga soo xado si ay ugu shaqeeyaan qoysas kale oo magaalooyinka ku nool.

Sahro Kooshin waxay sidoo kale aasaastay urur ay ugu magac dartay ururka gabadha waxqora ee Puntland (Puntland Women writers Association) iyo carwada sanadlaha ah ee Garowe. Waxa ay sidoo kale tirisay oo ay qortay gabayo dhowr ah oo ingiriis ah, qaar badan lagu turjumay afsoomaali iyo luuqado kale, sida gabaygeeda 'Waxaan Ahay Gabar Soomaaliyeed – I am A Somali Woman'.

## Qoraa Muna Maxamed Diirshe



### Horudhac

Muna Maxamed Diirshe waa qoraa dhowr buug isla markaasna u-ololeysa nabad ku wada noolaashaha reeraha Soomaaliyeed. Waxa ay waqti badan ku bixisay dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta qabaa'ilada wada-degga Gobolka Galgaduud. Waxa ay sidoo kale gobolkaas ka hirgelisay xarumo caafimaad iyo waxbarasho.

### Bilowgii nolosheeda

Muna Diirshe waxa ay ku dhalatay magaalada Muqdisho 25kii Diseembar, 1978 oo ay ku nooleyd ilaa dagaalada sokeeye ay qarxeen sanadkii 1991. Kadib waxa ay qoyskeedu u guureen dalka Yamani oo ay hooyadeed u dhalatay, halkaas oo ay ku barbaartay. Aabbeheed oo ku magacdheeraa 'Xaaji Kuweyd' wuxuu ahaa garsoore caan ah sanadihii toddobaatameeyaddii, isaga oo markii dambe na noqday agaasimaha wakaalada wararka qaranka Soomaaliyeed ee Sonna. Hooyadeed waxa ay ahayd yamanyad.

### Waxbarashada

Muna Diirshe waxa ay waxbarashada dugsiga hoose iyo dhexe ku qaadatay dugsiga Jabuuti ee magaalada muqdisho ku yaalay intii u dhaxeysay 1983-1990. Waxbarashada dugsiga sare waxa ay ku qaadatay magaalada Ticis (Taiz) ee koofurta dalka Yeman intii u dhaxeysay 1992-1996. Waxa ay Muna sidoo kale heystaa shahaado diblooma ah ee cilmiga maamulka mashaariicda (Diploma in Project Management).

### Buugaagta Muna

Muna Diirshe waxa ay sidoo kale qortay afar buug oo saddex ka mid ah ay ku saabsan yihiin taariikhda iyo nololaha haweenka Soomaaliyeed. Buugeedii ugu horreeyay oo la yiraa 'Haweenka Soomaaliyeed:

Shalay iyo Maanta – Somali Women: Yesterday and Today' waxaa la daabacay 2014kii. Wuxuu buugaan ka hadlayaa dhibaatooyinka colaadaha ka dhashay ee sida gaarka ah u saameeyay dumarka Soomaaliyeed. Wuxuu faahfaahinayaa kaalinta dumarka uga jiraan nololaha cusub ee qoyska Soomaaliyeed dagaalada sokeeye kadib, iyo sida dumarku halgan ugu jiraan buuxinta booska aabbe iyo hooyonimo iyaga oo badidood yihiin isha dhaqaale qoysaskooda.

Buugeeda labaad ee la daabacay 2014kii ee 'Illintan Qubaneysa yaa ka damqanaya – The tears of women..who cares?' waxa uu ku saabsan yahay xadgudubyada dumarku kala kulmaan ragga, si gaar ah goobaha shaqada. Waxa uu buugu taabanayaa dhaqan aan badanaa si daahfuran looga hadlin kaas oo ah in gabadho badan oo shaqodoon ah lagu qasbo in loo galmoodo si ay shaqo u helaan. Buugeeda saddexaad ee dumar iyo dareen wuxuuna ka hadlayaa dareenka iyo jacaylka qoyska. Muna waxay buuggan diiradda ku saartay nololaha qoysaska Soomaalida. Waxa ay hadda ku howlan tahay daabacaada buuggeedii afaraad ee 'Waayihii Xaaji Kuweyd' kaas oo ka hadlaya sooyaalka aabbeheed oo ahaa garsoore iyo weriye caan ah.

### Muna iyo Galmudug

Muna Diirshe waxa ay kaalin weyn ka qaadatay dhismaha dowlad-goboleedka Galmudug iyo heshiisiinta beelaha deegaankaas. Waxa xubin ka ahayd guddiga ansixinta dastuurka Galmudug ee kadibna soo xulay xildhibaanada maamul goboleedkaas. 2015 iyo 2016kii waxa ay qeyb ka ahayd ergooyin ka shaqeynayay dib u heshiisiinta beelaha wada dega galgaduud, waxa ayna ahayd gabadha keli ah ee ka midka ahayd ergooyinka ragga u badan.

Waxa ay ku guuleystay inay ku qanciso odeyaasha deegaanka in Cadakibir oo ah deegaan ku yaal Gobolka Galgaduud oo uu magacaa ugu baxay dagaal dhowr boqol oo sano kahor beelo ku dhexmaray magaca laga badelo. Deegaanka waxa ay hadda u bixisay 'Cadabarwaaqo'. Muna waxa ay hadda ka shaqeyneysaa oo gebogabo u maraya dhismaha dugsiga, xarun caafimaadka, guriga hooyooyinka iyo saldhig boolis oo uu deegaankaas yeesho markii ugu horreeyay.

## Wasiirka Dakadaha Maryan Aweys Jaamac



### Horudhac

Maryan Aweys Jaamac ( English: Mariam Aweis Jama ) waa wasiirka Dakadaha iyo Gaadiidka Badda, waana xildhibaan ka tirsan Golaha Shacabka. Waxa ay qeyb ka tahay xubnaha golaha wasiiradda ee Xukuumada Ra'isul wasaare Xasan Cali Kheyre. Waxa ay ka mid aheyd xildhibaanadii golaha shacabka ee Baarlamaankii 9 aad ee Dowladdii Madaxweynaha uu ka ahaa Xasan Sheekh Maxamuud iyada oo aheyd gudoomiyihii gudiga Xaquuqul Insaanka ee Baarlamaankaas. Intii u dhaxeysay sanadihii 2011-2012 waxa ay aheyd Wasiirkii wasaaradda Haweenka iyo Qoyska, ee xukuumadii uu Raysal wasaaraha ka ahaa Cabdiwali Maxamed Cali Gaas oo hadda ah Madaxweynaha Maamulka Putland.

Mudadii ay ahayd wasiirka arrimaha haweenka waxa ay ka shaqeyday sidii dib-u-dajin loogu sameyn lahaa dadka kasoo barakacay dhulka miyiga ah abaaraha dartood ee ku nool xeryaha caasimada Muqdisho. Sidoo kale waxa ay ka shaqeyday sidii loo dhaqan-gelin lahaa qoondada haweenka ee ah in 30% ku yeeshaan baarlamaanka federaalka ah. Waa hooyo dhashay 4 carruur ah oo ay labo gabadho yihiin.

### Bilowgii Nolosheeda

Maryan Aweys waxa ay 27 March 1970 ku dhalatay magaalada Muqdisho. Waxay ku barbaartay xaafadda Maanabooliyo ee degmada Shibis. Aabaheed waxa uu ka mid ahaa ciidanka xoogga dalka Soomaaliya wixii ka horreeyay dowlad burburka. Waxa uu sidoo kale la shaqeyay wasaarada waxbarashada isaga oo macalin ka noqday gobollada Jubbooyinka iyo Shabeelaha hoose. Waxa ay la dhalatay Daa'uud Aweys Jaamac oo ah weriye caan ah oo markii dambe noqday afhayeenka madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud. Wuxuu horey uga shaqeyay laanta Afsoomaaliga ee idaacadaha BBCda iyo VOA.

### Waxbarashada

Maryan Aweys Jaamac Waxa ay waxbarashada dugsiga hoose iyo dhexe ku qaadatay dugsiga Gahayr ee ku yaalla dagmada Xamar Jajab intii u dhaxeysay 1976 -1983. Waxa ay sidoo kale waxbarashada dugsiga sare e Raage Ugaas ku qaadatay intii u dhaxeysay 1983 – 1986dii. Waxa ay luuqadaha Ingiriiska iyo Faransiiska ka baratay Machadka Horumarinta Maamulka iyo Maareynta (Somali Institute for Development Administration and management; SIDAM) sanadihii 1986-1988dii. Dagaallada sokeeye ayaa qarxay iyada oo u jirta sanadka saddexaad Jaamacada Lafoole oo ay ka baranaysay maamulka Ganacsiga. Kadib Nayroobi ayay u guureen qoyskeeda iyada oo jaamacada Nairobi ka qaadatay shahaadada koowaad (Bachelor's degree) ee maamulka ganacsiga ee sanadkii 2004dii.

### Xirfad shaqo

Maryan Aweys shaqadii ugu horeysay waxa ay ka bilowday Kuleejo Nofa Soomaaliya oo laga baran jiray maamulka dhaqaalaha guriga intii u dhaxeysay sideetameeyadii illaa Sagaashameeyadii waqtigaasi oo ay waxbarasho ku jirtay. Shaqadii xigtay waxa ay ka heshay hay'adda American Friends Services Community oo ka bixin jirtay gobolada Banaadir iyo Shabeelaha hoose adeegyo horumarinta iyo caafimaadka la xiriira. Waxa ay hay'adaas u shaqeyday intii u dhaxeysay 1992-1994. Sanadihii 1995 -1998 waxa ay la shaqeyday hey'adda ACORD-Somalia (Agency for Co-operation and Research in Development), oo ay u qaabilsaneyd dhanka dib u dajinta dadka kasoo qaxay dagaallada ka socday gobollada labada shabeelle. Waxa ay sidoo kale la shaqeyday xafiiska hay'adda UNHCR ee magaalada Nayroobi sanadihii 2005-2010kii.

### Baarlamaanka

Maryam Aweys waxa ay xubin ka noqotay baarlamaankii 9aad ee Muqdisho lagu doortay sanadkii 2012kii. Waxaa xubnaha baarlamaankaas soo xulay odeyaasha dhaqanka Soomaaliyeed. Waxa ay kadib xubin ka noqotay Guddiga Xaquuqul Insaanka ee baarlamaanka. Waxaa markale dib loogu soo doortay xubinnimada golaha shacabka ee baarlamaanka federaalka ah ee 10aad sanadkii 2016kii. Waxaa lagu doortay magaalada Kismaayo. Waxaa bishii Maarso ee sanadkii hore loo magacaabay Maryam Aweys wasiirka dekedaha iyo gaadiidka badda ee dowladda federaalka ah ee Soomaaliya.

## Xaniifa Maxamed Ibraahim Xaabsade



### Horudhac

Xaniifa Maxamed Ibraahim Xaabsade (English: Hanifa Mohamed Ibrahim Habsade) waa xildhibaan ka tirsan Golaha Shacabka ee baarlamaanka federaalka ah ee 10aad. Waxa ay xubin ka tahay guddiga arrimaha dibadda ee golaha shacabka iyo xubnaha baarlamaanka u qaabilsan Urur goboleedka IGAD. Waa markii ugu horreysay ee ay xubin ka noqoto baarlamaanka Soomaaliya. Waxaa dhalay hoggaamiye kooxeed hore oo caan ah oo sdioo kale soo noqday xildhibaan iyo wasiir. Waa hooyo heysta gabar.

### Bilowgii Noloshada

Xaniifa Xaabsade waxa ay sanadkii 1991-dii ku dhalatay Tuulo lagu magacaabo Banaaney (Awjabe) oo hoostagta degmada Kuntuwaarey ee gobolka Shabeelaha Hoose. Waxa ay ku barbaartay magaalada Baydhabo oo ay ku qaadatay waxbarashada aas-aasiga ah.

Aabbeheed Maxamed Ibraahim Xaabsade waxa uu ka mid ahaa hoggaamiye kooxedyada iyo siyaasiyiinta ugu saameyn badnaa gobollada Bay iyo Bakool. Waxa uu wax ka dhisyay dowladihii KMG ahaa, oo uu kasoo noqday xildhibaan. Waxa uu wasiir ka noqday wasaaradaha kala duwan ee kala ah; Wasaarada Dekedaha, wasaarada Beeraha iyo Wasaarada Dib-u-heshiisiinta.

### Waxbarashada

Waxa ay waxbarashada dugsiga hoose iyo dhexe ku qaadatay dugsiga Model ee magaalada Baydhabo intii u dhaxeysay 1998-2006dii. Waxa ay waxbarashada dugsiga sare ku qaadatay Hoyga Xamar ee Muqdisho ku yaal intii u dhaxeysay 2006-2009kii. Waxa ay shaahadada koowaad ee jaamacada ee Ganacsiga Caalamiga ah ka qaadatay

jaamacada Multimedia University ee Malaysia sanadkii 2012kii.

### Xirfad-shaqo


